

Parent-to-Parent Support

Isbarta Qoyska:

Hoyada: Safia
Aabaha: Ali

Caruurta: Ahmed, 4, dhagaha
waxba kama maqlo
Hassn, 10
Nimo, 13

Habka uu kula xirriro dadka: Codka
Baadhitaan

Marka la ogaaday: Waa markii uu
dhashay

Waxa uu gashadaa qalabka dhagaha

Waalidka qiimaha leh:

Waxa aan aad ugu faraxnay marka oo noo dhashay wiil caafimaad qaba.

Waa uu fiicna dhinac walba oo aad ka eegto. Laakin nursiga ayaa waxa ay nagu tidhi waxa baadhitaan lagu samaynayaa xaga maqalka, anaguna wax wayn umaanan arag sabata oo ah hada ka hor kuma ayna dhicin qof ka mid ah qoyska. Markii lanoo sheegay in loo baahanyahay baadhitaan dambe in lagu sameeyo oo uu arko qof khibrad u leh ayaan warwarnay. Markii laga qaaday baadhitaan kale oo ay baadheen dadk khibrada u leh maqalka (audiologist), ayaa waxa ay ku sheegen in uuna si fiican wax u maqlin(mild/moderate hearing loss). Aad iyo aad ayaan uga xumaanay. Aqoon umaanaan lahayn qof leh ilmo yar oo si fiican wax aan u maqlin. Waxa aan is waydiinay noloshi-iso sida ay ku dambayan doonto?

Waxa aan aad uga soo horjeednay in aan arimaha qoyskayaga aan la wadaagno qof kasta. Anaga oo ah dad ka yimid wadanka Soomaaliya, uma aanan baran oo dhaqan nooma ahayn in aan arimaha qoyska kala sheekaysano qof walba. Ha ahaato eh, waxa aan oganaanay in aan aamini karno, macalimiinta, dhakaatiirta, iyo dadka kale ee diyaarka u ah in ayna caawiyaan. Waxa kale oo aan la kulanay qoysas kale oo nala mid ah si aanan u dareemin in aan kali nahay. Waxa aan faa'iido wayn ka helnay in aan lakulano qoysas kale oo Soomali ah oo leh caruur baahi gaar ah leh.

Maanta, wiilkayagu aad ayuu u fiican yahay. Waxa uu isticmaalaa qalabka loogu talagay xaga maqalka, waxa uuna aadaa iskuulka caruurta dhagaha la'a. hadalkiisu waa uu soo fiicnaanayaa waxa aanan hubnaa in wax kasta uu qabsan karo marka uu koro. Waxa aanu aaminsanahay in ay tahay duco xag ala ah dadka faraha badan ee na caawiyaya. Waxa aanan ilaahay ka rajaynaynaa in aad adiguna hesho sidaa oo kale. Kaliya codso, waad heli doontaa mucaawinaad.

Waxa aan idiin rajaynaynaa wanaag iyo khayr

Waa Cali iyo Safiya

Hadii aad u baahato warbixin xaga qoysaskan oo kale, fadala la soo xiriir Family Support Connection 1-866-DHOHKID, amaba 651-265-2435 magaalda gudaheeda. Aamba waxa aad e-mail usoo dirtaa fsc@lifetrackresources.org.